



STAY SAFE MN

DAAWADA COVID-19

Difaacyada Jirka Monoclonal

Daawada COVID-19, oo loo yaqaano difaacyada jirka ee Monoclonal, ayaa ka caawin kara dadka da'aha 12 jirka iyo kuwa ka wayn inay la dagaalamaan xanuunkooda. Sidoo kale waxay kahortaggi kartaa xanuun ku dhaca dadka qaar.

Haddii aad la xanuunsan tahay COVID-19, daawada ayaa kaa ilaalin karta in xanuunkaagu kasii daro, waxayna kaa caawinaysaa hoos u dhigida mudada aad la xanuunsan tahay. Waxaad awooddi kartaa inaad hesho daawada haddii:

- ✓ Lagaa helay caabuqa COVID-19.
- ✓ Astaamahaagu biloowdeen muddo ka yar 10 maalmood kahor.
- ✓ Aan isbitaal lagu dhigin.

Haddii aad la joogtay qof qaba COVID-19 ama aad khatar wayn ugu jirto inaad la joogtay qof qaba COVID-19, sidoo kale waad awooddi kartaa inaad daawada hesho haddii:

- ✓ Aadan qaadan labada kuuro ee talaalka Pfizer ama Moderna, ama halka kuuro ee talaalka Johnson & Johnson.
- ✓ Aad qabto nidaamka difaaca jirka oo liita (tusaale ahaan, haddii aad qabto xanuun hoos u dhigaaya difaacaaga jirka, ama aad cunto daawooyinka difaaca daciifiya).

Inta badan daawooyinka COVID-19 ayaa lagu heli karaa si bilaash ah.

Visit [COVID-19 Medication Options \(health.mn.gov/covidmeds\)](https://health.mn.gov/covidmeds) ama la hadal dhakhtar caafimaad si aad u hubiso aad u qalmi karto aadna u hesho rug caafimaad.

Sidoo kale waxaad wici kartaa Laynka gurmada COVID-19 ee dadwaynaha oo ah 1-833-431-2053, Isniinta ilaa Jimcaha laga bilaabo 9 a.m. ilaa 7 p.m., Sabtiyada laga bilaabo 10 am ilaa 6 pm. si laguugu xiro rug.



Minnesota Department of Health | health.mn.gov | 651-201-5000 625

Robert Street North PO Box 64975, St. Paul, MN 55164-0975

La xariir health.communications@state.mn.us si aad u codsato xogta oo qaab kale u qoran.

8/30/2021 (Somali)